

Talaabooyinka 23 Maajo

Dawladdu waxay leedahay xeerar si ay fayraska Koronaha u joojiso. Xushmee xeerarka. Haddii aad sidaas yeesho xanuunku kugu dhici maayo qof kalena ku ridi maysid.

Xeerarka badankooda waxa la joojiyay Maajo 23. Maxaa kale oo lagaa rabaa inaad sameyso?

Maaskarada afka

- Ma jirtaa 12 sano ama in ka badan? Markaa maaskarada afka waa qasab.
 - Marka aad joogto xarunta diktoorka ama farmashiyaha
 - Marka aad joogto cisbitaalka
- Ma joogtaa meel dadku ku badan yahay oo mashquul ah. Markaa waxa fiican in aad xirato maaskaro afka.

Safarka dalka dibaddiisa:

- Ma aadaysaa dalka dibaddiisa? Waxa jira koodho-midabo ah(kleurcodes) oo kala duwan.
 - Boore (Grijs): waa deegaan ama dal aan xog badan laga haynin. Waxa fiican in aadan u safrin.
 - Guduud-madaw(Donkerrood): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa ay sarayso. Waxa fiican halkan inaad u safrin.
 - Liimi(Oranje): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa dhexdhexaad ay tahay. Halkan waxa fiican in aadan u safrin.
 - Cagaar(Groen): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa ay hoosayso. Halkan waad u safri kartaa.
 - Ka fiiri bogga internetka <https://www.info-coronavirus.be/nl/kleurcodes-per-land/>
- Dalka aad aadayso xeerarka ka jira ka fiiri bogga internetka ee diplomatie.belgium.be

Ma waxaad ka timid aag khatar-tiisu ay aad u sarayso?

- Macluumaad ka guud ee aagagga waxaa laga heli karaa [info-coronavirus.be/nl/hoog-risico-landen/](https://www.info-coronavirus.be/nl/hoog-risico-landen/)
- Kani ma yahay waddan ka baxsan Midowga Yurub?
 - Waa inaad karantiil ku jirtaa 10 maalmood. Tan waxaa laga rabaa qof walba.
 - Isbaar maalinta 1 iyo maalinta 7 kadib markaad ku soo laabato Beljamka.
- Kani ma ka tirsan yahay Midowga Yurub ama aagga Schengen?
 - Ma haysatid shahaado tallaaf?Isbaar maalinka 1-aad ee aad guriga ku soo laabato.

- Baaritaankaagu ma yahay mid taban(negatief)? Markaa waad ka bixi kartaa karantiilka. Kadib mar kale is baar maalinta 7.
- Baaritaanku ma yahay mid togan (positief)? Waa inaad xayiraad (isolation) ku jirtaa 10 maalmood.

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga rabaa in uu xushmeeyo. In aad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.